

(1)

Xeerarka dhismaha qoyska iyo qaababka loo ilaalinayo

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{ وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ } .

(waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina Haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan Calaamad qoomkii fikiri)

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Jiritaanka qoyska xaga nolosha aadanaha wuxuu ka mid yahay nimcooyinka Alle (caza wa jalla) ee ugu waaweyn, wuxuu ku galladeystay Alle (SW) addoomihiisa nimcadan oo ku sugan kitaabkiisa kariimka ah, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{ وَاللَّهُ جَعَلَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا وَجَعَلَ لَكُمْ مِنْ أَزْوَاجِكُمْ بَنِينَ وَحَفَدَةً وَرَزَقَكُمْ مِنَ الطَّيِّبَاتِ أَفَبِالْبَاطِلِ يُؤْمِنُونَ وَبِنِعْمَتِ اللَّهِ هُمْ يَكْفُرُونَ } .

(Eebe wuxuu idinka yeelay naftiinna azwaj wuxuuna idinka yeelay Haweenkiinna caruur iyo farac idinkuna arsaaqay wanaag ma baadhilbay rumayn oy Nicmada Eebay ka Gaaloobi)

(2)

Qoyska waa aasaaska bulshada, waa dhufeyska difaaca ugu horreeya; sidaa awgeed islaamka wuxuu ku dadaalay inuu si adag u dhiso oo is haysata, taasoo dadka u keenaysa kalgacal iyo naxariis; amaanka iyo xasilloonida ayaa bulshada oo dhan wada gaaraysa, shareecada islaamka waxay la timid in loo baahan yahay si fiican in loo doorto qofka nolosha lala wadaagayo, taasoo keenaysa deganaanta nolosha lamaanaha, sidoo kale waxay ku boorrisay inuu qofka awoodo mas'uuliyadda qoyska dhammaan dhinaca dhaqaalaha iyo bulshada iyo nafsiga, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(يَا مَعْشَرَ الشَّبَابِ مَنِ اسْتِطَاعَ الْبَاءَةَ فَلْيَتَزَوَّجْ، فَإِنَّهُ أَغْضُ لِلْبَصْرِ وَأَحْصَنُ لِلْفَرْجِ،
وَمَنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَعَلَيْهِ بِالصَّوْمِ فَإِنَّهُ لَهُ وَجَاءٌ).

(Dhalinyarooy qofkii awoodo guurka ha guursado, maxaayeelay isagaa aragga u laabid badan farjigana u ilaalin badan, qofkii aan awoodin ha soomo , maxaayeelay wuxuu u yahay gooyn)

Shareecada islaamka waxay si xoog leh ugu dadaashay in ubadka si wanaagsan loo tarbiyeeyo, iyo in la dareensiiyo mas'uuliyadooda xagga diintooda iyo bulshadooda, iyo dalkooda, taasoo aasaasaysa in la dhiso qoys adag oo toosan, iyadoo loo soo marayo in lagu beero ubadaka qiyamka diiniga iyo kuwa bulshada, iyo dhaqanka waxtarka leh; maxaayeelay iyaga waa amaano dusha ka saaran labada waalid, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنْفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ}

(Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax) , wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(3)

(إِنَّ اللَّهَ سَائِلٌ كُلَّ رَاعٍ عَمَّا اسْتَرْعَاهُ، أَحْفَظَ ذَلِكَ أَمْ ضَيَّعَ؟ حَتَّى يُسْأَلَ الرَّجُلُ عَلَى أَهْلِ بَيْتِهِ)

(Ilaahay wuxuu weyddiinayaa qof kaste wuxuu u dhiibtay ma ilaaliyay mise waa dayacay? ilaa uu ka weyddiiyo ninka qoyskiisa), sidoo kale wanaagga ubadka wuxuu farxad u yahay aabbeyaasha iyo hooyooyinka adduun iyo aakhiraba, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{ وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَاجِنَا وَذُرِّيَّاتِنَا قُرَّةَ أَعْيُنٍ وَاجْعَلْنَا لِلْمُتَّقِينَ إِمَامًا }،

(waana kuwa dhihi Eebow naga sii haweenkanaga iyo caruurtanada wax ishu ku qabowsato, noogana yeel kuwa dhawrsada imaam) wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(إِذَا مَاتَ ابْنُ آدَمَ انْقَطَعَ عَنْهُ عَمَلُهُ إِلَّا مِنْ ثَلَاثٍ: صَدَقَةٍ جَارِيَةٍ، أَوْ عِلْمٍ يُنْتَفَعُ بِهِ، أَوْ وَلَدٍ صَالِحٍ يَدْعُو لَهُ).

(Qofka markuu dhinto camalkiisa wuu go'ayaa seddex waxyaabood mooyee, sadaqo soconaysa, iyo aqoon laga faa'idayo, iyo wiil suuban oo usoo duceynaya)

Wuxuu noo caddeeyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) dadka waxaa ugu khayr badan nin iyo naagba waxay ahaadaanba qofka ehelkiisa ugu khayr badan, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(خَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لِأَهْلِهِ)

(Kiina ugu khayrka badan waa kan ehelkiisa ugu khayrka badan), wuxuu ahaa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) mid ugu khayr badan ehelkiisa, ninka ugu fiican, aabbaha ugu wanaagsan, iyo awoowaha ugu fiican, qofkaan khayr u lahayn ehelkiisa wax khayr uu leeyahay ma jiro.

(4)

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato midka ugu sharafta badan khalqiga sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Islaamak wuxuu ku dadaalaa dadaalka ugu daran siduu u ilaalin lahaa jiritaanka qoyska, asoo isku xiran oo is jecel oo ku taagan jacayl iyo tixgalin iyo is qadarin labada dhinacba, qofka fiirfiiriya quraanka kariimka wuxuu ogaanaa inuu haweeneyda ku mgacaabay inay zowj u tahay ninka, quraanka kariimka kuma soo aroorin ereyga zowja, waxaad moodaa quraanka kariimka inuu kasoo qaatay isla sinnaanta luqadda iyo ereyga tilmaan oo tilmaamaysa inay macne ahaan u siman yihiin, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{ هُنَّ لِبَاسٌ لَكُمْ وَأَنْتُمْ لِبَاسٌ لَهُنَّ }،

(dhar (asturaad bay) idiin yihiin, idinkuna dhar (asturaad baad) u tihiin), wuxuu leeyahay (SW):

{ وَلَهُنَّ مِثْلُ الَّذِي عَلَيْهِنَّ بِالْمَعْرُوفِ }

(Haweenkuna waxaay leeyihiin wax la mid ah waxa korkooda ah oo wanaag ku dhisan) wuxuu leeyahay (SW):

{ لِلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا كَتَبْنَا لِلنِّسَاءِ وَلِلنِّسَاءِ نَصِيبٌ مِّمَّا كَتَبْنَا لِلرِّجَالِ }

(Ragga waxaa uga Sugnaaday Qayb waxay kasbadeen. Haweenkana waxaa uga Sugnaaday qayb waxay kasbadeen), wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markuu khudbeynayay khudbadii xajka sagootiska:

{ أَلَا إِنَّ لَكُمْ عَلَى نِسَائِكُمْ حَقًّا، وَلِنِسَائِكُمْ عَلَيْكُمْ حَقًّا }

(Haweenkiina xaq baad ku leedihiin iyaguna xaq bay idinku leeyihiin)

(5)

Arrinka ka dhexeeya lamaanaha wuxuu ku taagan yahay xasillooni iyo kalgacal iyo naxariis iyo xaquuq iyo waajibaad labadaba ka dhexeeya iyadoo laga fog yahay dhamaan islaweyni iyo is sarraysiin, nolosha qoyska lagama yaabo inay ku xasisho jawi gumaad iyo kibir iyo islaweyni leh, waxay ku hasishaa jawiga is qadarinta iyo tixgalinta labada dhinacba ka dhexeeya, inay labada dhinac ay ka shaqeeyaan farxadgalinta iyo dulqaadka iyo ka hortagga waxyaalaha dhibka keenaya, wuxuu ahaa sayidkeena Abuu Addardaa (Alle raalli haka noqdee) mid ku yiraahdo xaaskiisa: hadaad i aragto anoo xanaaqay i raalligali haddaan ku arko adoo xanaaqsan waan ku raalligalinaa haddii kale islama socon karno.

Maxaa ka qurux badan in qoyska ku noolaado si degan oo farxad leh ilaa laga helo libaanta adduunka iyo aakhiro.

Eebow naga sii haweenkanaga iyo caruurtanada wax ishu ku qabowsato, noogana yeel kuwa dhawrsada imaam